



Juun 25, 2021

Bulshada qaaliga ah ee MPS,

Waxaan rabaa inaan qof walba oo idinka mid ah uga mahadceliyo taageeradiina iyo dabacsanaanta aad muujiseen intii lagu jiray sanadkii la soo dhaafay. Dhammaanteen waxaan la qabsannay xaaladaha marba isbedelaya ee cudurka safmareenka, waxaana ku guuleysanay inaan hal ujeedo maskaxda ku heynto: u adeegida baahiyaha ardaydeena. Qaado daqiiqad si aad ugu raaxaysato [fiidiyowgan muraajicinta ah](#) ee tilmaamo ka bixinaya sanad dugsiyeedkeena 2020-21.

Waxaan rabaa inaan idinla wadaago warbixino muhiim ah oo ku saabsan sanad dugsiyeedka 2021–22.

Dhammaan dugsiyada MPS waxay u furnaan doonaan waxbarashada qof ahaan looga xaadiro shan maalmood usbuucii. Dhismayaasha iskuulku waxay u furnaan doonaan dadweynaha, qoysaskuna waa inay la xiriiraan xafiiska dugsiya si ay ballan ugu qabsadaan booqasho. Barnaamij khadka tooska ah ku baxa ayaa loo fidin doonaa qoysaska aaminsan in waxbarashada khadka tooska ah ay tahay xulashada ugu fiican ee carruurtooda. Laga bilaabo bisha Luulyo, qoysaska muujiyey inay rabaan barnaamijka khadka tooska ah waxay heli doonaan wicitaan taleefan oo dabagal ah si ay uga jawaabaan wixii su'aalo dheeraad ah una sii wadaan nidaamka diiwaangelinta.

Sidii hore oo kale, MPS waxay ku shaqeyn doontaa laba jadwal. Dugsiyada sare, iskuulada dhexe ee kaligood taagan, iyo iskuulada K-12 waxay raaci doonaan Jadwalka Bilowga Hore. Dhammaan dugsiyada hoose iyo barnaamijka khadka tooska ah waxay raaci doonaan Kalandar Dhaqmeedka.

MPS waxay ubaahantahay in maaskarada wajiga lagu xirto dhamaan dhismayaasha, iskuulada, iyo basaska. Daboolida wajiga looma baahna inta la joogo banaanka ama inta shaqsiyaadka ay wax cunayaan ama wax cabayaan. Inta ay ku jiraan dhismaha, ardayda iyo shaqaaluhu waxay ku dhaqmi doonaan kala fogaansho masaafo jireed oo saddex fuut ah, oo dhammaan fasallada iyo goobaha la wadaago waxaa loo samayn doonaa filtarada HEPA. Dhismo kasta waxay yeelan doontaa shaqaale nadaafadeed oo dheeraad ah, oo meelaha taabashadu ku badan tahay si joogto ah ayaa loo nadiifin doonaa maalinta oo dhan.



**MILWAUKEE**  
PUBLIC SCHOOLS

Waxaan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqno soo celinta cayaaraha fudud. Diiwaangelinta isboortiga dayrta ee dugsiya sare hadda way furan tahay. Ardayda ka qeybqaadanaysa isboortiga banaanka looma baahnaan doono inay xirtaan maaskaro. Isboortiska lagu cayaaro gudaha, maaskaro looma baahan doono inta ay ardaydu tartamayaan, laakiin maaskaro ayaa loo baahan doonaa xilliyada aysan tartameynin (tusaale ahaan, inta ay keydka ku jiraan). Ardayda dugsiya sare ee danaynaya inay ciyaaraan cayaaraha isboortiga dayrta waa inay iska diiwaangeliyaan khadka tooska ah <https://bit.ly/3xUdna2>.

Barnaamijyada dugsiya kahor iyo kadib ah way furnaan doonaan, oo ay kujiraan Xarumaha Waxbarshada Bulshada ee Dugsiya Ku Salaysan (CLCs) iyo Xarumaha Madadaalada Milwaukee iyo Goobaha Nabdoon. Macluumaadkan waxaa si joogto ah loogu cusbooneysiin doonaa [Milwaukee Recreation Before- and After-School Care web page](#). (Bogga internetka ee [Daryeelka Dugsiya Kadib iyo Kahor ah ee Madadaalada Milwaukee](#).)

Tallaallada COVID-19 ayaa loo heli karaa qof kasta oo 12 jir ah ama ka weyn waxaana la arkay inay yihiin kuwo badbaado iyo waxtar leh. Waxaan kugu dhiirrigelinaynaa in dhammaan xubnaha qoyskaaga ee ka weyn da'da 12 la tallaalo. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan tallaallada, booqo [Milwaukee Health Department COVID-19 web page](#). (Bogga internetka [COVID-19 ee Waaxda Caafimaadka Milwaukee](#).)

Waxaan rabaa dhammaan ardayda, qoysaska, iyo shaqaaluhu inay dareemaan kalsooni ku aadan dib ugu soo noqoshada nabadgelyada leh ee fasallada dayrta. Degmadu waxay sii wadi doontaa inay dadka la wadaagto warbixinada cusub inta lagu jira xagaaga oo dhan. Fadlan wixii warbixino cusub ah ka eeg websaydhka dugsiyada iyo degmada, baraha bulshada, iimaylka, iyo farriimaha.

Waxaan rajeynayaa inaan ku soo dhoweeyo qof walba dugsiya marka la gaaro dayrta!

Si daacad ah,

Dr. Keith P. Posley  
Maamulaha Guud ee Dugsiyada